

**Xeerka Wasiirka Caafimaadka, 15 Abriil lamba. 75.**

**Mamnuucidda Hawlgallada Xirfadd Caafimaadka ee Dabecadda Gaarka leh.**

### **WASIIRKA CAAFIMAADKA**

Marka uu arkay Warqadda koowaad iyo Warqadda Labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

Marka uu arkay Xeerka 2 Maarso 1972 lamba. 23 ee ku saabsan mamnuucidda hawlgallada xirfadda caafimaadka ee leh dabecadda gaarka;

Marka uu arkay qod. 5 ee isla Xeerkaa, kaasoo loo siiyay Wasiirka Caafimaadka awoodda in uu go'aamiyo iyo caddeeyo taariikhda uu Xeerkaanu dhaqangalayo.

Marka uu arkay xeerka 3 Juun 1962, lamba. 12 ee Xeer Nidaamiyaha Dowladda iyo isbaddallada ka dambeeyay;

### **WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

#### **Qodobka Qura**

Taariikhda 1 Maajo 1972 waxaa la go'aamiyay taariikhda uu dhaqangalayo Xeerka 2 Maarso 1972 lamba. 23 ee ku saabsan mamnuucidda hawlgallada xirfadda Caafimaadka ee leh dabecadda gaarka. Dekereetadaan waxaa lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka iyo Deketreetooyinka.

Muqdisho, 15 Abriil 1972.

Wasiirka Caafimaadka  
**Dr. Maxamed Aadan Sheikh**